QORSHAHA YAREYNTA DHIMASHADA DHALAANKA OHIO (OIMRI: Ohio Infant Mortality Reduction Initiative)

Waxay soo booqdaan guriga xaamilada iyo waalidiinta dumarka African-American iyo dhalaankooda ku sugan xaafado tilmaaman (zip codes).

Telefoon: 645-7068
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

QORSHEYNTA IYO AQOONSIGA

Waxay isku dabaridaan istraatijiyada qorshaha waaxda; waxay cabbiraan raali gelinta macaamilka; waxay hoggaamiyaan qorshaha hagaajinta tayada; iyo, waxay kormeeraan sida CPH ogu hoggaansanto heerarka caafimaadka gobolka iyo qaranka.

Telefoon: 645-5139
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

ADEEGYADA TAAGEERADA XAAMILADA

Waxay iskudabbaridaan adeegyada caafimaadka iyo bulshada ee dumarka xaamilada iyo dhalaankooda, sida baarista xaamilada, xariirka, iyo booqashooyinka guriga; iyo, la xariirka adeegyada.

Telefoon: 645-7068
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco
ama ballan uu qabso

DARYEELKA CAAFIMAADKA AASAASIGA -

Xarunta Caafimaadka Xaafadaaha Columbus (Columbus Neighborhood Health Center)

Waxay bixiyaan daryeelka caafimaadka aasaasiga, OB, caruurta, aragga, iyo ilkaha, waxayna siiyaan dhamaan da' kasta. Wac si aad u heshid macluumaad ama ballan.

Telefoon: 645-5500, xulashada 1aad

MASHRUUCA L.O.V.E.

(Love Our Kids Vaccinate Early)
(Jecloow Caruurtena Si Horay Loogu Talaalo)

Iskaashiga bulshda taasoo caruurta Degmada Franklin ku kaalmeysa in la talaalo marka ay gaaraan 2 sanno; iyo, waxay bixisaa adeegyo si looga hortago Cagaarshowga (Hepatitis).

Telefoon: 645-7559
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco
Internetka: www.project-love.org

ARRIMAHA DADWEYNAHA IYO ISGAARSIINTA

Wuxuu ka shaqeyaa xariirka warbaahinta iyo shaqada ku saabsan siyaasadda caafimaadka dadweynaha; wuxuu macluumaadka caafimaadka iyo adeegyada siiyaa dadweynaha, wuxuu iskuduwaa codsiyada diiwaanka dadweynaha; iyo, wuxuu horumariyaa ololaha waxbarashada.

Telefoon: 645-6928
Saacadaha: 7:30 am - 4:30 galabnimo, Isniin - Jimco

BARNAAMIJKA RYAN WHITE

Waxay isku xertaan iyo waxay hajisataan dadka qaba HIV/AIDS si ay u daryeelaan, sida adeegyada caafimaadka bukaan socodka, caafimaadka madaxa, qamrada iyo mukhadaraadka, kaalmada guryaha iyo danabka. Waxay u adeegaan degmooyinka Franklin, Licking, Delaware, Morrow, Union, Madison, Pickaway iyo Fairfield.

Telefoon: 614-645-CARE (2273)
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin - Jimco

BULSHADAHA AMMAANKA QABA

Waxay horumariyaan ammaanka baabuurta waxayna iskaashi la samayaan bulshada iyadoo ahamiyadda siiso isticmaalka suunka ammaanka, cabbitaanka iyo baabuur wadidda, xawaareynta, ammaanka socdaha, dhalinta baabuurta waddo, iyo ammaanka mootada.

Telefoon: 645-1667
Saacadaha: 8:30 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin - Jimco

XILLIYADA HARGABKA (Seasonal Influenza)

Waxay aqoon iyo xariirin siiyaan dadka waaweyn iyo caruurta iyo waxay qiyaas kooban talaalka hargabka dadka waaweyn ee lacag la'aanta ah siiyaan dadka waaweyn, kuwa xaqa u yeesha; iyo waxay kaalmeyaan ganacsiyada shaqaalaha siiya talaalka hargabka.

Telefoon: 645-7559
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

CAAFIMAADKA GALMADA

Waxay bixisaa macluumaad, waxay asturtaa waxa qofka uu qabo, iyo waxay daweysaa cudurada lagu gudbiyo galmada (STIs, sexually transmitted infections), kana mid ah baaritaanka HIV/AIDS iyo waxay dadka u diraan ilaha bulshada. Looma baahna in la qaato ballan. Bukaanka waxaa loo qaabilaa sida ay u soo kala hormareen.

Telefoon: 645-7772
Saacadaha: 8 subaxnimo - 2:15 galabnimo, Isniin
10 subaxnimo - 6:15 maqribnimo, Talaado
8 - 11:15 subaxnimo, Arbaco
8 subaxnimo - 4:15 galabnimo, Qamiis/Jimco

Waxaa dhici karto in kliinikada horay u joojiso fiirinta bukaanka haddii ay buuxsanto. Waxaa jira goobo kale oo lagu baaro HIV gudaha bulshada. Waa isbaddalaan saacadaha. Wac si aad u ogaatid goobaha iyo waqtiyada.

HAWADA GUDAHA AAN QIIQ LAHAYN

Waxay bixiyaan barista ashtakada iyo hirgelinta sida hoos timaado sharciga Goobaha Shaqada ka Madax Banaan Qiiqa ee Gobolka Ohio (State of Ohio Smoke Free Workplace).

Telefoon: 866-559-OHIO (soo sheegidda ashtakada)
645-7005 (macluumaadka barnaamijka guud)
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin – Jimco

TIIBISHADA - KANTAROOLKA TB EE BEN FRANKLIN

Waxaa laga helaa baaris, daweyn, maamulka kiiska, waxbarasho, iyo hoggaamin la siiyo dadka daggan Columbus iyo degmada Franklin ee qaba TB nool; waxay tilmaamaan waxayna qiimeeyaan xariirka TB; iyo, waxay qiimeeyaan baahida loo qabo in la daweeyo qaxootiga iyo muhaajiriinta cusub ee soo gala iyaga oo qaba xaaladda TB Darajada A, Darajada B1, ama Darajada B2 (iyo warqadaha la xariira). Si loo helo adeegyada, waa in la qaato ballan.

Telefoon: 645-2199 (si loo qabsado ballan)
Saacadaha: 8 subaxnimo - 2:15 galabnimo, Isniin
10 subaxnimo - 6:15 maqribnimo, Talaado
8 - 11:15 subaxnimo, Arbaco
8 subaxnimo - 4:15 galabnimo, Qamiis/Jimco

BADBAADINTA BIYAHA

Waxay bixiyaan shattiyada iyo waxay baaraan barkadaha lagu dabaasho ee dadweynaha, biyaha lagu cayaaro, waraabinta beeraha, ceelasha biyaha ee gaarka loo leeyahay, nidaamka bullaacadaha reerka iyo kuwa bar ka bar u adeega dadweynaha (ganacsiyada yaryar) iyo bullaacadaha qaada wasakhda adag si loogu hoggaansamo sharciyada u dagsan Gobolka Ohio; iyo, waxay tababaro siiyaan hawl wadeenada balliyada.

Telefoon: 645-8191
Saacadaha: 7:45 subaxnimo - 4:45 galabnimo, Isniin - Jimco

WIC (Women, Infants and Children Program)

(Barnaamijka Dumarka, Dhalaanka iyo Caruurta)

Waxay raashin dheeraad ah iyo aqoonta nafaqada siiyaan dumarka xaamilada, dumarka naas nuujiya iyo dumarka dhalay, dhalaanka iyo caruurta ilaa ay ka gaaraan 5 sanno. Wac si aad u qaadatid ballan.

Telefoon: 645-7280
Saacadaha: 7:30 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin/Arbaco/Qamiis
(waa xeran tahay: 12:30-1 duhurnimo)
9 subaxnimo - 7 fiidnimo, Talaado
(waa xeran tahay: 2-3 duhurnimo)
7:30-11:30 subaxnimo, Jimco

CAAFIMAADKA DUMARKA IYO QORSHEYNTA QOYSKA

Wuxuu bixiyaa baarista sanad kasta ee dumarka, kantaroolka dhalashada iyo qorsheynta nolosha dhalmada dumarka iyo ragga; baaritaanada uurka; iyo baarista qaar ka mid ah kansarada iyo cudurada lagu gudbiyo galmada. Waxaa loo baahan yahay ballamo si loo helo adeegyo, marka laga reebo baaritaanada uurka.

Telefoon: 645-1850
Saacadaha: 8 subaxnimo - 2:15 galabnimo, Isniin
10 subaxnimo - 6:15 maqribnimo, Talaado
8 - 11:15 subaxnimo, Arbaco
8 subaxnimo - 4:15 galabnimo, Qamiis/Jimco

QORSHAHA FIYOOBIDA DHALINTA

Wuxuu horumariyaa fiyoobida dhalinta, wuxuuna u adeegsadaa barnaamijka dhalinta muddada dheer iyo iskaashiga lala sameeyo ururada deegaanka; iyo wuxuu martigeliyaa Isutagga Bartamada Ohio ee Caafimaadka galmada (Central Ohio Coalition for Sexual Health).

Telefoon: 645-7368
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

Dhamaan Adeegyada Caafimaadka waxaa loo heli karaa Adeegyada Tarjamada Luqadda. La xariir shaqaalaha Waaxda Caafimaadka (Health Department) si aad u heshid kaalmo.

Waa isbaddalaan saacadaha. Fadlan horay u wac. Waa la xeraa fasaxyada magaalada iyo maalmaha kale oo la xulay.

Dhamaan nambarada waxay ka bilowdaan koodka xaafadda (area code) 614, haddii aan si kale loo sheegin.

Magaalada Columbus waa Bixiye ku Shaqeeyo Fursadda Siman/Loo Shaqeeye EEO.

La casriyeyay 1/2015

THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR
COLUMBUS PUBLIC HEALTH

240 Parsons Ave
Columbus, OH 43215

COLUMBUS PUBLIC HEALTH
Telefoon: 614-645-7417
Faks: 614-645-7633
E-mail: health@columbus.gov
Adeegyada Magaalada: 614-645-3111
www.publichealth.columbus.gov

▲ Adeegyada caruurta ♥ Adeegyada dumarka ○ Adeegyada dadka waaweyn ● Adeegyada qorsheynta bulshada ■ Adeegyada kliinikada/la-talinta ≡ Adeegyada maamulka ■ Adeegyada shatti bixinta/baarista

THE CITY OF COLUMBUS
ANDREW J. GINTHER, MAYOR
COLUMBUS PUBLIC HEALTH

MUUJIYAHA ADEEGYADA

www.publichealth.columbus.gov

HELITAANKA DARYEELKA

Kaalmada qofka laga siiyo diiwaan gelinta ceymiska caafimaadka Medicaid iyo Suuqa Ceymiska Caafimaadka (Health Insurance Marketplace).

Telefoon: 645-1244
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

BARNAAMIJKA XADGUBKA MUKHADARAADKA IYO QAMRADA

Waxaa laga helaa ka-hortagga ku xadgudubka mukhadaraadka iyo qamrada, faragelinta iyo daweynta bukaan socodka; taageerada la siiyo caruurta ay saameyso ku tiirsanaanta qamrada ama mukhadaraadka; iyo, gargaarka farsamada si bulshada uga hortagto.

Telefoon: 645-7306
645-8462 Barnaamijka HAA (YES Program)
(taageerada la siiyo da' yarta 5-13)
Saacadaha: 9 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin/Jimco
9 subaxnimo - 9 habeenimo, Talaado - Qamiis

QANIINYADA XAYWAANKA, XAYWAANKA HALISTA AH KANTAROOLKA RAABIYADA

Wuxuu ka jawaabaa ashtakooyinka la xariira qaniinyada xaywaanka; wuxuu macluumaad ka bixiyaa xaywaanka iyo caafimaadka dadweynaha; iyo, waxaa laga helaa kliinikada talaalka raabiyada.

Telefoon: 645-6134
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4 galabnimo, Isniin - Jimco

SHAHAADOOYINKA DHALASHADA IYO DHIMASHADA (Tirakoobka Aasaasi ah)

Waxaa laga helaa koobiyada shahadooyinka dhalashada iyo dhimashada ee Degmada Franklin; khidmadda waa $25. Macluumaadka waxaa laga heli karaa bogga internetka www.publichealth.columbus.gov.

Telefoon: 645-7331
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4:15 galabnimo, Isniin/Talaado/Qamiis/Jimco
9 subaxnimo - 4:15 galabnimo, Arbaco

Marka la tago, isla maalintii ayaa la bixiyaa adeegga, Isniin - Jimco, waxaa la xeraa 4 galabnimo

BIXINTA SHATTIYADA SAWIRKA JIRKA

Wuxuu baaraa iyo wuxuu shatti siiyaa tattoo iyo waxyaabaha lagu duro jirka.

Telefoon: 645-7005
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin - Jimco

BARNAAMIJKA BRIDGE (Bridge Program)

Wuxuu dadka ku xeraa takhtarka daryeelka caafimaadka aasaasiga ee ku sugan Xarunta Caafimaadka Xaafadaaha Columbus (Columbus Neighborhood Health Center).

Telefoon: 645-1269
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin - Jimco

KIIMIKADA IYO HALISTA JIDHKA

(Chemical and Physical Hazards)
Waxay baaraan iyo waxay talo ka bixiyaan arrimaha cudurada wasakhda iyo halista; iyo waxay isu diyaariyaan kana jawaabaan degdegga kiimikada.

Telefoon: 645-7005
Saacadaha: 7:45 subaxnimo - 4:45 galabnimo, Isniin - Jimco

MAGAALADA WEYNTA COLUMBUS SIISTEMKA KA JAWAABIDDA CAAFIMAADKA

(CMMRS: Columbus Metropolitan Medical Response System)
Waxay qorsheyaan degdegga caafimaadka dhacdooyinka kiimikada, biolojiyada, shucaaca, nuklearka iyo qaraxa.

Telefoon: 645-6736 or 645-7089
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

TELEFOONKA XAQA BULSHADA U LEEDAHAY IN AY OGAATO (Community Right-To-Know Hotline)

Wuxuu lagu kormeeraa, wuxuun bixiyaa macluumaad ku saabsan kiimikada la isticmaalo ama ku keydsan gudaha Columbus/Degmada Franklin.

Telefoon: 645-6275
Saacadaha: 7:45 subaxnimo - 4:45 galabnimo, Isniin - Jimco

ABUURISTA BULSHO CAAFIMAAD QABTA

Waxay la shaqeyaan iskaashatada bulshada si looga hortaggo cudurka soo noqnoqda, loo horumariyo iyo loo taageero jimicsiga, nafaqada/helitaanka raashiinka, iyo ka-hortagga isticmaalka tubaakada.

Telefoon: 645-0743
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

KLIINIKADA ILKAHA

Waxaa laga helaa adeegyada ilkaha, sida baaritaanka, raajada-x, nadiifinta, buuxinta, soo-saaridda (saaridda ilkaha), godadka jiridda ilkaha qaar (root canal), iyo hagaajinta ilkaha. Tagidda degdegyada qaar (saacadaha waa isbaddalaan). Wac si aad u heshid fasiraad.

Telefoon: 645-7487
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4 galabnimo, Isniin - Qamiis
8 subaxnimo - 3 galabnimo, Jimco
(Maalin kasta waxaa la xeraa 11:30 a.m.-1 p.m.)

BARNAAMIJKA BUUXINTA ILKAHA

Waxaa laga helaa buuxinta ilkaha (blaastiigga la mariyo) gowsaha dambe ee joogtada ah ee ardayda darajada 2aad iyo 6aad ee dhigta dugsiyada agagaarka Columbus. Ma jiro kharash la bixiyo, waxaa la ogol yahay Kaarka cafimaadka.

Telefoon: 645-6853
Saacadaha: 8 subaxnimo - 3:30 galabnimo, Isniin - Jimco

ISU DIYAARINTA DEGDEGGA

Waxay xoojisaa awoodda Columbus u leedahay in ay isu diyaariso kana jawaabto degdegga iyada oo la shaqeysa wakaaladaha kale, soo saaridda iyo ku-dhaqanka qorshooyinka degdegga, kormeeridda cudurada tababarada la siiyo dadka ka jawaaba, iyo bixinta macluumaadka dadweynaha.

Telefoon: 645-7089
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

FAAFINTA (ISQABADSIINTA CUDURADA)

Wuxuu aruuriyaa, wuxuu kala dhigdhigaa, iyo wuxuu tarjumaa xogta lagu qiimeeyo caafimaadka bulshada iyo qorsheynta barnaamijka caafimaadka, fullinta, iyo qiimeynta; wuxuu ka shaqeyaa kormeerka cudurka iyo baarista cudurada dilaaca; iyo wuxuu isu diyaariyaa/wuxuu ka jawaabaa halista caafimaadka dadweynaha.

Telefoon: 645-6252
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

BADBAADINTA RAASHINKA IYO SHATTI BIXINTA

Waxay bixiyaan shattiyada iyo waxay baaraan hawlaha adeegga raashinka iyo ganacsatada raashinka tafaariiqda; iyo, waxay shirar u qabtaan shaqaalaha.

Telefoon: 645-7005
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin - Jimco

SOO SHEEGIDDA CUDURADA LA XARIIRA RAASHINKA

Waxay baaraan ashtakooyinka la xariira cudurada raashinka ee ka yimaada bulshada.

Telefoon: 645-1791
Saacadaha: 7:45 subaxnimo - 4:45 galabnimo, Isniin - Jimco

CARUURTA CAAFIMAADKA QABTA, MIISAANKA CAAFIMAADKA LEH

Waxay la shaqeyaan agagaarka xarumaha daryeelka carrurta Columbus iyo iskaashato kale xagga ka-hortagga cayilka iyaga oo hagaajiya habka raashinka iyo jimicsiga caruurta jirta 0-5 sanno.

Telefoon: 645-7520
Saacadaha: 8:30 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

GURYAHA CAAFIMAAD QABA

Waxay bixiyaan qiimeynta lagu sameeyo guryaha iyo kaalmada looga hortaggo halista iyaga oo ahamiyadda siiya waxyaabaha dhaliya neefta iyo sunta macdanta "lead."

Telefoon: 645-8191
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4:30 galabnimo, Isniin - Jimco

XAAFADAHA CAAFIMAAD QABA

Waxay dhisaan nolosha caafimaadka qabta iyaga oo hela macluumaadka caafimaadka, munaasabadaha caafimaadka bulshada, waxbarashada bulshada, iyo guddiyada la-tallinta caafimaadka ay bulshada hoggaamiso. Waxaa dhici karto in saacadaha isbaddalaan, taasoo ugu wacan shirarka la qabto fiidkii.

Telefoon: 645-0732
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

GOOBAHA CAAFIMAADKA

Waxay horumariyaan nolosha firfircoon iyaga oo abuuro meelo dadka ay ku dhaqdhaqaaqi karaan maalin kasta nolosha, sida khariidooyinka meelaha lagu socdo iyo qorsheynta magaalada.

Telefoon: 645-5318
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

DUGSIYADA CAAFIMAADKA QABA

Waxay baaraan dugsiyada dadweynaha iyo dugsiyada gaarka si loo badbaadiyo caafimaadka iyo ammaanka caruurta iyaga oo ka hortagga halista.

Telefoon: 645-7005
Saacadaha: 8 subaxnimo - 4 galabnimo, Isniin - Jimco

ILAHA AMA ADEEGYADA AADANAHA

(Human Resources)
Waxay ka shaqeyaan shaqaaleynta, xariirka shaqaalaha, iyo maamulka ilaha aadanaha.

Telefoon: 645-6238
Saacadaha: 7 subaxnimo - 4 galabnimo, Isniin - Jimco
Telefoonka Shaqada Adeegga Madaniga (Civil Service Job Line) 645-7667 (24-saac, Isniin - Jimco)

ADEEGYADA TALAALKA

Waxay bixiyaan talaalka iyo waxbarashada la siiyo caruurta iyo dadka waaweyn.

Telefoon: 645-7945
Saacadaha La Tago:
8 subaxnimo - 2:15 duhurnimo, Isniin
10 subaxnimo - 6:15 maqribnimo, Talaado
8-11:15 subaxnimo, Arbaco
8 subaxnimo - 4:15 galabnimo, Qamiis/Jimco
Waxaa dhici karto in kliinikada horay u joojiso fiirinta bukaanka haddii ay buuxsanto.

Saacadaha Kliinikada Worthington (600 High St, Worthington):
1-4 galabnimo, 3rd Talaado ee Bil kasta

BAARISTA CUDURKA LEYSKU DAARTO

Waxay baaraan kiisaska la soo sheego cudurada leysku daarto; waxay kormeeraan cudurka ku jiro bulshda; iyo, waxay ka hortagaan faafidda cudurka.

Telefoon: 645-1474 *ama* 645-7417 (degdegga kalkaaliyaha la waco)
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

NIDAAMKA KA WARBIXINTA CUDURKA LEYSKU DAARTO

Waxay fududeyaan iyo waxay isku habeyaan soo sheegidda cudurka leysku daarto ee la gaarsiiyo waaxda caafimaadka deegaanka. Waxaa loo sameeyay dadka ka shaqeeyo daryeelka caafimaadka iyo shaybaarada.

Telefoon: 525-8888 (24-saac) / www.idrsinfo.org
Faks: 525-8890

KA HORTAGGA DHAAWACA

Wuxuu bixiyaa macluumaad iyo adeegyo si looga hortaggo dhaawacyada; hubinta ammaanka kursiga baabuurka; iyo wuxuu bixiyaa kuraasta baabuurta qiimaaha jaban iyo koofiyada baskiilada.

Telefoon: 645-6138
645-7748 (barnaamijka kursiga baabuurka)
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

MACADKA NOLOSHA FIRFIRCOON

(Institute For Active Living)
Waxay ka hortagtaa cayilka iyo sokorta iyadoo qaadda talaabooyin si loo kordhiyo raashinka nafaqada leh iyo jimicsiga dadka daggan Columbus; iyo waxay shaqadooda taageeraan iskaashiga bulshada.

Telefoon: 645-4798
Saacadaha: 8:30 subaxnimo - 5:30 galabnimo, Isniin - Jimco

CAAFIMAADKA DADKA TIRADA YAR

Waxay hoggaamiyaan baahida caafimaadka dadka, jinsi ahaan iyo umad ahaan, tirada yar iyaga oo adeegsada aqoonta iyo xariirinta ku saleysan diinta; iyo waxay bulshadaha kala shaqeyaan arrimaha caafimaadka.

Telefoon: 645-7335
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

KANTAROOLKA DHILMAAYADA IYO SHILLINTA

(Mosquito & Tick Control)
Waxay kormeeraan iyo waxay kontaroolaan dhilmaayada iyo shillinta si looga hortaggo cudurada; waxay baaraan berkadaha lagu dabaasho ee gaarka loo leeyahay si looga hortaggo in dhilmaayada aysan meesha ku badanin; iyo waxay ka tashadaan kantaroolka cayayaanka.

Telefoon: 645-3111 (Qadka degdegta ee 24-saac) ama 645-8191
Saacadaha: 7:45 subaxnimo - 4:45 galabnimo, Isniin - Jimco

CUNUGEYGA IYO ANIGA

Wuxuu iskuduwaa booqashada guriga iyo adeegyada caafimaadka iyo bulshada ee la siiyo dumarka (waqtiga uurka ka hor iyo kaddib) iyo caruurta ilaa ay ka gaaraan 2 sanno. Wuxuu u adeegaa qoyska oo idil, oo ay ku jiraan aabayaasha.

Telefoon: 645-7068 (faks 645-0865)
Saacadaha: 8 subaxnimo - 5 galabnimo, Isniin - Jimco

SHAQADA BULSHADA EE XAAFADDA

Waxay dadka daggan la xariiriyaan ilaha bulshada, qiimeynta caafimaadka iyo baarista laga bixiyo Xarumaha Sharafta Xaafadda (Neighborhood Pride Centers) iyo goobaha kale ee bulshada.

Saacadaha: 8 subaxnimo - 4 galabnimo, Isniin - Jimco

Far East Pride Center	724-0100
Franklinton Pride Center	645-0176
Near East Pride Center	724-0115
North Side Pride Center	724-1900
South Side Pride Center	645-8097
Social Work Qadka Cawinada	645-6807

BOOQASHADA GURIGA CUNUGGA CUSUB

Waxay booqasho ugu tagaan hooyooyinka iyo dhalaanka; waxay qiimeyaan koriimada cunugga; waxay siiyaan aqoon; iyo, waxay hooyooyinka la xariiriyaan daryeelka caafimaadka iyo adeegyada kale.

Telefoon: 645-8323
Saacadaha: Waa in la qabsado ballan

▲ Adeegyada caruurta ♥ Adeegyada dumarka ○ Adeegyada dadka waaweyn ● Adeegyada qorsheynta bulshada ■ Adeegyada kliinikada/la-talinta ☰ Adeegyada maamulka ■ Adeegyada shatti bixinta/baarista